# Faysal Rooble: Qorsheeye, Falanqeeye iyo Jabhad Hore

**W/Q Axmed Sanwilwilo**

**Disember 03, 2025**

---

Badhtamaha sannadkii 2016 ayay ahayd kolkii baraha bulshada Soomaalida uu qabsaday dhawaaqa wadaado kala duwan, kaasi oo ku salaysnaa falcelin ay ka samaynayeen hadal la soo jarjaray oo ay jeediyeen aqoonyahan Soomaaliyeed. Waxaa dhaleecayn, maagid, diin ka saarid iyo aflagaado loo gaysanayay rag uu ku jiro Mudane Faysal Cabdi Rooble. Waa dharaartii ay caanka noqotay tuduca, "Diin ma ku dhaqmaynaa? *I will say, no!*" oo laga soo jaray jawaab uu Faysal Rooble ka bixinayay su'aal la waydiiyay. Kaliya waxaa hadalkiisa laga soo qaatay intaa aan xusay. Su'aasha laga jawaabayo waxa ay ka dab qaadanaysaa dood ku saabsanayd Habqaybsiga Guddoonka Soomaaliya oo soconayay waqti ku dhow laba saacaddood. Qof walba oo barnaamijkaa daawaday wuu dareemayaa degdega dadka sida qalloocda u adeegsaday hadalkaas, si gaar ahna midka Faysal oo isagu aan tuurin ku dhaqanka iyo isku maamulka diinta. Xilligaas ayaan anigu bartay Faysal, waxa aanna doonayaa in aan qoraalkan ku soo koobo nolosha Faysal iyo waxyaabaha uu ku darsaday qaadhaanka aqoonta Soomaalida iyo dunida.

Faysal Cabdi Rooble, waxa uu ku dhashay magaalada Jigjiga ee Deegaanka Soomaalida. Sida uu marar kala duwan xusayna waxa uu ka dhashay qoys reer Jigjiga ah oo wax badan ka gaystay kacdoonnadii kala duwanaa ee geeska ka aloosnaa, kuwaas oo ay ugu waa weynaayeen middii diinta, guumaysi la dirirka iyo gobannimada. Faysal waxaa aad u qaabeeyay hab fikirkiisa iyo noloshiisaba halgannadaas kala duwan ee uu ku dhex dhashay, waxa uuna marar kala duwan qayb ka ahaa kacdoonnadii dahsoonaa ee dhalinyarada, kuwaas oo ka soo horjeeday nidaamyadii Itoobiya ka talinayay. Waxa uu ku koray Jigjiga, iyada ayuu ku qaatay waxbarashadiisii dugsiga hoose iyo dhexe. Kaddibna waxa uu qayb ka noqday Jabhaddii Xoraynta Soomaali Galbeed (WSLF), isaga oo ka mid ahaa dhawr dhalinyaro ah oo jabhadda kaga biiray magaalada Hargaysa, xaruntoodii koowaadna ay ahayd Xerada Qabribaxar.

Waxa uu Faysal xusay in isaga iyo dhalinyartii la socdayba ay bilowgaba ka biyodiideen qaabka ay jabhaddu u shaqaynayso oo ay waqtigaa ku milnayd qabyaaladdu, aragti ahaanna wixii ay ka aaminsanaayeen la dagaalanka Itoobiya iyo fikirka dhalinyaradu aanu is qaadanayn. Si kasta oo ay tahayba, way ku biireen, waxa ayna qaateen tababarradii kala duwanaa ee ay hoggaanka jabhaddu bixinayeen.

Isdiidooyin isbiirsaday oo ay ugu waynayd mid mabda'eed ayaa sababay in uu ka baxo jabhadda, iyada oo aan halgankii laga tagayn. Magaalada Hargaysa ayuuna ka dhammeeyay dugsigiisii sare. Kolkii uu dammaystay waxbarashada iskuulka waxa uu u sii hayaamay magaalada Muqdisho, isaga oo ku biiray Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, qaybteeda Lafoole ee Waxbarashada. Muqdisho waa magaaladii uu waxbarashadiisa heerka koowaad ee dhanka jaamacadda ku soo qaatay. Juqraafiga ayuu ka diyaariyay Lafoole oo ah mid kamida meelaha uu baholyowgiisa Xamar ka xuso. Sida uu sheegayna waxa ay Xamar u noqotay hoy uu ku nasto oo uu ku tilmaamay joogisteedi, "Maalmihii dahabiga ahaa."

Lafoole waxa ay iska heleen rag badan oo ay isku aragti ka ahaayeen dhanka jabhadda WSLF, halgankii qoriga ee ka fashilmayna waxa ay u rogeen dhanka abaabulka qalinka. Xilligii uu tagay Xamar waxaa bilaabanayay dagaalkii Soomaalida iyo dawladdii Itoobiya, jabhaddii uu hore uga tirsanaa ee WSLF oo ay dawladda Soomaaliya saamayn weyn ku lahaydna waxaa xafiis uga furnaa Xamar. Faysal iyo dhalinyaro door ah oo Lafoole u badan waxa ay kala shaqayn jireen jabhadda hawlo ay ugu badnaayeen qoraallada iyo samaynta barnaamijyada. Dagaalkii Soomaaliya iyo Itoobiyaana halkaas ayuu kaga jiray, isaga oo wata qalin.

Muqdisho waxa ay u ahayd magaalo badashay noloshiisa, waxa uuna marar badan xusaa jacaylka iyo hilowga uu u qabo waqtigiisii Muqdisho. Waxa uu xilligaa noqday macalin wax ka dhiga dugsiyada ku yaalla caasimadda, isaga oo bare ah ayuu galay hammiga dhoofka, waxa uuna ku hanwaynaa in uu sii ballaadhsado waxbarashadiisa iyo adduun aragiisa. Waxa uu xiriir la sameeyay xafiis ka mida kuwa Qaramada Midoobay (QM) si uu u helo maalgalin ama taageero waxbarasho oo Maraykan ah. Codsigaa uu dirsaday waxa ay u qabteen muddo bilo ah, ayna iyagu u soo jawaabi doonaan. Sida uu ku xusayo waraysi uu siiyay Cabdi Faarax (Juxa), wasaaraddii waxbarashada Soomaaliya ayaa ku xujaysay in uu magaalada Qardho macalin ka noqdo inta looga soo jawaabayo si uu dalka dibaddiisa ugu dhoofo. Waa uu aqbalay, muddo koobanna waxa uu macalin ka ahaa magaalada Qardho ee gobolka Bari. Halkaas ayay wasaaraddu ku xanibtay, markii uu waayay wax falcelin ahna, dhanka wasaaradda, waxa uu si dhuumasho ah ugu laabtay Xamar. Damiin dhanka QM ah ayuu kaga badbaaday jeel, waxa uuna Xamar dib uga bilaabay macalinnimadiisii, waxa uuna turjubaan iyo shaqooyin kale la qabtay hay'adda QM.

Faysal waxa uu nasiib u yeeshay in uu noqdo Soomaaligii u horreeyay ee QM u qaaddo Maraykanka. Waxa uuna ku baxayaa qaxootinimo, taas oo dacalka ku haysa dagaalkii xoraynta Soomaali Galbeed. Mar aan wax ka waydiiyay safarkiisa, waxa uu ii sheegay in uu 1981-dii tagay Maraykanka. Waxa uu degay Los Angeles oo ah magaalada ay ka bilaabanayso, ku dhismayso oo ku korayso noloshiisa qurbuhu. Faysal oo ka sheekaynaya safarkiisa ayaa ku sifeeyay, "Markii aan Maraykanka tagay, sida hadda dadku qaxootiga u tagayaan may ahayn. Jiilkaa iyo kuwii berigaa nagaga horreeyay Maraykan iyo dibadaha kaleba waxay u tagayeen waxbarasho. Markaan tagayay niyadaydu waxbarashay ahayd, saddex illaa afar sanno waxbaro oo soo noqo." Sida uu qorshihiisa koowaad ahaa ayuuna yeelay, waxa uuna xeraystay Jaamacadda Kalifoorniya ee Los Angeles (University of California, Los Angeles, UCLA). Waxa uu Faysal ii sheegay in ardayda Soomaaliyeed ee wax ka baranaysay jaamacadda UCLA ay u kala baxayeen laba qaybood oo kala ah; qolo ay dawladda Soomaaliya soo dirsatay oo dib ugu noqonaya dalka iyo qolyo kale oo iyagu iska bixiya lacagta jaamacadda, balse isagu aanu labadaasba ahayn ee uu si toosa u dalbaday deeq waxbarasho, ayna jaamacaddu ka aqbashay.

Si uu jaamacadda u bilaabo waxa uu ku khasbanaaday in uu California deganaado muddo hal sanno ah, si uu u noqdo qof deegaan ah. Muddadaas waxa uu horay u galay magaalka, waxa uuna noqday nin xoogsade ah oo shaqeeya, waxa uuna ka hawl galay dukaan ku yaalla Los Angles oo la dhoho 7/11, markii danbena uu xisaabiye ka noqday. Faysal oo iiga waramay dukaankan ayaa yidhi, "Muddo gaaban waxaan ka shaqeeyay dukaan caan ah oo la yidhaa 7/11. Inkasta oo aan ku bilaabay kaashiyeer, shirkaddii lahayd laba nin oo ka mid ah, ayaa aad ugu qushuucay sida hufnaanta leh ee aan shaqada u qabanayey. Maalin maalmaha ka mid ah ayey labadii nin ee madaxda ka ahaa shirkadda, xafiiska gudaha ah iigu yeedheen, waxa ayna i dheheen, "Waxaan faylkaaga ka aragnay inaad jaamacad ka soo baxday. *Bookkeeping* ama xisaabiye ma noqon kartaa?" Ilaahay amarkii intaanan shirkaddan 7/11 shaqada ka qaban, waxaan lix bilood dhammaystay *bookkeeping* oo shahaado la igu siiyey. Waan u sheegay in jaamacadda ay ii weheliso farsamada *Bookeeping* ama xisaabiyaha. Halkaas ayaa kaashiyeernimadii la iiga dalacsiiyey oon ku noqday xisaabiye. Muddo lix bilood ah ayaan sidaas ku shaqeynayey."

Sannadkaa ka dib, waxaa aqbashay jaamacadda UCLA, waxa uuna shahaadada labaad ee MA kaga diyaariyay waxa loo yaqaano *MA in Afro-American Studies* iyada oo xoogga la saarayo *Political Science*-ka, sannadku markuu ahaa 1984 ayuu qalin-jabiyay. Sidoo kale, 1986 ayuu isla jaamacadda UCLA ka diyaariyay shahaadadda 2-baad (Master) ee Qorsheynta Magaalooyinka iyo Horumarinta Degaanada (*Urban and Regional Development)*. Kolkii uu wabarashada dhammaystay, 1986 ayuu dib ugu soo laabtay Soomaaliya. Waxa uu u yimi dalka shir ay Wasaaradda Qorshayntu soo qabanqaabisay. Xilligaas kolkii uu dalka yimi ayuu sameeyay qiimayn guud oo ku aadan xaalka uu dalku ku socdo, waxaana u soo baxday in aanay wanaagsanayn jidka la hayo, markaas ayuuna go'aansaday in uu ku laabto Maraykan oo uu halkaa shaqo ka raadsado.

Waxyaabaha uu ka xusay dalka ee xilligaa taagnaa waxaa ka mid ahaa saansaanta dagaal ee la saadaalin karayay, musuqmaasuqa baahsan ee dalka ka jiray iyo soo galitaanka hay'adda IMF oo aan sawir fiican ka bixinayn dalka. Maadaama uu Faysal jaamacadda UCLA ka bartay Qorshaynta, waxa uu 1988 ka shaqo bilaabay Los Angeles, waxa uuna ku biiray waaxda qorshaynta ee magaaladaas, shaqadiisii u horreysayna waxa ay ahayd in uu noqdo *Junior Planner*. Laba sanno ka dibna, waxa uu u dallacay *Planning Assistant*, isaga oo ugasii dallacay *Planning Associate* illaa uu ka gaarayay darajada *Principal City Planner* oo uu ku noqday ninkii u horreeyay ee madow ah oo darajadaas ka gaara maaraynta magaalada Los Angeles. Dhanka dallacsiinta, *Principal City Planner* waa booska u sarreeya ee laga gaaro, waxa uu qofku halkaa uga socdaa waa in golaha iyo maareeyaha guud ee magaaladu ay u igmadaan boos siyaasaddeed, Faysalna waxa uu fursad u helay in uu noqdo Guddoonka Sare ee Golaha Xaqsoorka iyo Qorshaynta.

Muddadii uu hawshan gacanta ku hayay waxa uu Faysal qabtay shaqooyin aad u badan oo uu ku mutaystay ammaan iyo abaalmarin badan. Abaalmarinnada uu ku guulaystay waxaa ka mid ah, midka ay bixiso *National American Planning Association* oo ah abaalmarin caalami ah, wuxuuna ku guulaystay ama hantay saddex kal oo kala duwan. Waxaa kale oo aan ka xusi karnaa, abaalmarinno kala duwan oo uu ka helay maamulka magaalada Los Angeles oo marar kala duwan maamuustay. Midkii uu Los Angeles ka helay 2013-kii ayay ku sifeeyeen in uu ku hantay doorkii uu ka gaystay qorshaynta, horumarinta, kobcinta dhaqaale iyo casriyaynta magaalada Los Angeles.

Kolka laga soo tago shaqooyinka uu Marykan ka hayay Faysal Rooble ee ku arooraysa xirfaddiisa qorshaynta, waxaa jira door kale oo aad u ballaaran oo uu Faysal ka gaystay dhanka falanqaynta siyaasadda, qoraalka iyo wax ka dhihista jihada dawladnimada Soomaalida iyo Geeska. Faysal waxa uu qalinka qaatay kolkii uu Xamar u yimi jaamacadda, qalinkii uu ku taageerayay xoogaggii Xorraynta Soomaali Galbeed ayuu haddana xoog u adeegsaday dhawr iyo labaatankii sanno ee u danbaysay. Mar aan wax ka waydiiyay sooyaalkiisa qoraalka waxa uu ka yidhi, “Waxaan qoraalkaygii ugu horreeyay isku duba riday anigoo Qardho jooga 1980. Waxaan aad u akhriyi jiray laba nooc oo buug ah; 1) Kuwa siyaasadda iyo garabka bidixda; iyo 2) Buugta suugaanta Ingriiska. Labo sheeko oo gaaban oo aan shaac bixin ayaan qorey 1980 markaan Qardho joogay (Dhowr bilood oo aan macalin ka ahaa dugsiga sare ee Qardho). 1991 ayaan si rasmi ah u bilaabay qoraallada siyaasadda ee ku qotoma caddaaladda iyo taariikhda. Waxaan maqaalo ku daabici jiray *The Ethiopian Review* oo Xarunta Karter (Carter center) maal galin jirtay. Qoraaladayda xilligaas, oo illaa labaatan maqaal ka badan oo qaarkood illaa 30 bog noqonayaan, laba arimood ayaan kaga hadli jiray: Difiaaca iyo ilaalinta dawladdii ka burburtay Soomaaliya iyo siyaasadda Itoobiya iyo xaqa iyo xuquuqda Soomaali Galbeed. In aan qoraallada daba joogo maaxdeedu waxa weeye aniga oo illaa dugsiga dhexe markaan ku jiray arrimaha Soomaaliyeed si gaar ah u danayn jiray.”

Waxa uu Faysal daabacay qoraallo aad u badan oo uu kaga waramayo siyaasadda, dhaqanka iyo dawladnimada Soomaalida iyo Geeska. Waxa uu qayb ka noqday dooddo iyo shirar aad u badan oo qodobadaa lagaga waramayo. Waxyaabaha aadka loogu xasuusto waxaa ka mid ah qoraallada uu sida joogtada ah ugu daabaco Wardheernews oo uu ka mid ahaa asaasayasshi, isaga oo soo noqday *Madaxa Guddiga Tifatirka* ( Chair of editorial board). Qalinkiisa iyo codkiisu waxa ay muddo dheer ahaayeen mid dawladnimada Soomaalida ugu baaqda jidka saxda ah. Dhanka siyaasadda marka laga yimaado, waxa uu Faysal qalinkiisa ku xardhaa xasuusihiisa nololleed, taas oo aan ka soo qaadan karno qoraalka uu ka sameeyay Muqdisho iyo Los Angeles, *A Tail of Two Cities, A Personal Perspective On Mogadishu and Los Angeles*, waxa uu sawirayaa magaalada u bishay dhalinyaranimadiisa ee u samaysay adduun araga fog, kolkii uu bartay aqoonta qorshayntana waxaa xiise gaar ah u sii sameeyay qaabka, nolosha iyo dhismayaasha Xamartii uu jeclaa.

Dhanka kale, Faysal waa cilmi-baadhe madax bannaan oo soo saaray maqaallo aqooneed tira badan, waxa uuna ahaa madaxa cilmibaadhista hay’adda *Institute for Horn of African Studies and Affairs*. Qoraalka iyo dedaalkiisa arrimaha bulshada waxa uu ku helay abaalmarino oo ay ka mid tahay midda ay Wardheernews u aqoonsatay 2016-kii- *Person (s) of the Year*. Dhanka kale, Faysal waxa uu ka mid yahay madaxda sare ee Xarunta Horumarinta iyo Cilmibaadhisa Puntland, PDRC, oo uu ku jiro boodhkeeda. Majaladaha *The Ethiopian Review* iyo *The Horn Africa Journal* ayaa iyaguna ka mid ah kuwa uu wax ugu darsaday tafatire ahaan.

Sida aan bilowga qoraalkanba ku xusay, waxaa jiray dood uu ka qaybgalay Faysal Rooble oo xilligii ay soo baxday muddo kaddib ay dood ka dhalisay baraha bulshada Soomaalida. Diiseenbar 6, 2014 ayuu qayb ka ahaa dood ay soo agaasintay Madasha Fagaaraha oo qabata doodo ku saabsan arrimaha Soomaalida, kulankaas oo ahaa kii 14aad waxaa cinwaan u ahaa, Habqaybsiga Awoodda Guddoonka Soomaaliya, waxaana ku casunnaa saddex aqoonyahan oo kala ah, Maxamed Cabdi, Faysal Rooble iyo Prof. Cabdillaahi Cismaan. Kaddib muddo ku dhow laba sanno waxaa baraha bulshada Soomaalida ku faafay muuqaal la jarjaray oo salka ku hayay su’aal la waydiiyay martida oo u dhignay, “Soomaaliya diin malagu dhiqi karaa?”

Faysal oo su'aashan ka jawaabaya ayaa ku bilaabaya, maya, waxa uuna sababaynayaa waxa uu u jeedo, waana isaga leh, "Dad inaga muslinsan ma jiro, haddii Aadan Cadde iyo Cabdirashiid dawladdoodii aad aragto, dad muslimiin ah oo aan cidna fasax uga qaadanayn muslinnimadooda ayay ahaayeen. ... dad muslimiin ah oo sharaf leh ayay ahaayeen, sidaasna dalkooda way ku wadeen." Faysal oo hadalka sii wata ayaa dhahaya, "Waxa aan ka soo horjeedaa in Soomaaliya lagu dhaqo diinta mutaxan ee xagjirka Islaamiga ah sheeganaysa. Waxaan ogolahay, diintii macaanayd ee sunniga ahayd ee ummadda Soomaaliyeed illaa Axmed Guray ku dagaal gashay, tii in aan ku waxayno [ku dhaqno dalkeena]." Sida aad ka dheehanaysaan jawaabta Faysal, waxa uu diidan yahay xagjirnimada iyo argagixisada, waxa uuna ogol yahay diinteena oo uu ku sifaynayo diin macaan oo aan ka soo gaarnay ab ka ab.

Mar kale, oo arrinkaa wax laga waydiinayona waxa uu sheegayaa in warkiisu cad yahay, uuna tilmaamayo in Soomaalidu tahay dad Muslin ah oo Sunni ah, weligeedna ku jirtay u dagaalanka diinta Islaamka, laga soo bilaabo Axmed Guray, Sayid Maxamed, dhalinyartii SYL iyo dawladdii rayidka ahaydba. Waxa uu lee yahay, waa aanu naqaanaa diinteena ee iyada aan isku xukunno, waxa aan diidannahayna waa midda argagixisada ah. Muuqaalka faafay 2016-kiise waxaa la soo jartay inta u horreysa ee ah "I will say, no!", waxaana lagu dhajiyay jawaabta Maxammed Cabdi oo aan filayo in ay tahay midda saartay sawirka aanu Faysal u socon. Maxammed, waxa uu isagu ku galgalanayaa jawaabta, sida uu Hassan M. Abukar ku xusay qoraalkiisa, *Umal and Faisal: Clash of the Titans*, waxa uu Maxammed Cabdi ka soo jawaabayaa hadalka wadaadada waxa uuna ku guuldaraysanayaa in muuqaalkiisu noqdo mid wax laga soo qaado. Ismaaciil Cali Ismaaciil Geeldoon, isaguna qoraal uu ka qoray arrinkan ayuu si gaar ah uga waramayaa aqoonyahanka Soomaaliyeed, wadaadada iyo diinta Islaamka.

Sheekh Umal ayaa ka mid ahaa wadaadada ka falceliyay hadalka googo'an ee Faysal Rooble, si adag ayuu uga hadlay, sida ay dad badan qabaan. Faysal oo aan falcelinta Sheekh Umal waxba ka odhan xilligaa, ayaa 2021-kii waraysi uu siiyay SSTV ku sheegay sababta uu uga gaabsaday, waxa uuna yidhi, "Anuu waan ka gaabsaday, qaarbaa xogo iisoo diray, laakiin af iguma yaalo aan Sheekh Umal ku aflagaadeeyo. Mana aha booskayga." Dhanka kale, wariyaha ayaa su'aalay in waxa uu Sheekhu ku raddiyay ay isku mid ahaayeen ama kala duwanaayeen, waxa uuna ka yidhi, "Isku shuqulba ma ahayn." Oo waxa uu ka waramayaa taariikhdiisa aan hadda ka soo sheekaynay ee uu waynaanta ku tagay Maraykan, isaga oo caddaynaya in hadalka Sheekh Umal ee ahaa, "Waa kuwaa barofesariintii ay gaalo soo tababartay ee laga soo shaqeeyay ee afartanka sanno la soo tababaray…" aanu isagu ahayn ee uu yahay jabhad ku dhashay Jigjiga, Xamarna ku soo loox jiitay. Isaga oo jaamacadda koowaad dhammeeyay muddona shaqaynayay uu Maraykan tagay.

Gunaanadkii, Oktoobar 15, 2025 ayaa Faysal Rooble loo doortay xildhibaan Soomaaliya ku matali doona Bulshada Bariga Afrika oo ay Soomaaliya ku biirtay dhawaan. Waxa uu ka mid noqonayaa sagaalka xubnood ee ururkaas ku matalaya dalka. Sidoo kale, hadda waxa uu gacanta ku hayaa buug ku saabsan taariikhda Soomaalida ee uu guumaystuhu qariyay, waxa uu baaritaan ku samaynayaa magaalooyinka qadiimka ah ee Soomaalida iyo xadaaradeheeda.

Faysal waa qoraa ay saameeyeen qoraayadii Afrikaanka ahaa ee ay ka mid yihiin Ngugi wa Thiong`o, Kwame Nkrumah, Amilcar Cabral, Aime Cesaire iyo saaxiibkii John Saciid. Waa magaalo qaabeeye, aabbe, falanqeeye, qorsheeye, siyaasi, doodyahan tifatire iyo jabhad hore.

W/Q: Axmed Sanwilwilo
Email: *ahmadek2018@gmail.com*

**-----------------**

***FG***: *Qoraalkan waxaa xigasho u ah waraysiyo uu bixiyay Faysal Rooble oo uu ugu mudan yahay midka uu siiyay Cabdi Faarax Juxa. Waxa kale oo xigasho u ah jawabaaha uu iga siiyay su'aalo aan toos u weydiiyay Faysal (via Email), sidoo kale, qoraallo dhawr ah oo laga qoray, kuwaas oo badankood lagu daabacay Wardheernews. Waxaana intaa dheer, qoraallo uu isagu qoray oo raadraac u ah qoraalkan. Xigashooyinkan waxa ay dul saaran yihiin maqaalka, hyperlink.*